# Oktoobar 2024

## Ka qayb galinta Bulshada:
## Hubinta Kala guurka Waxbarashada Hore

### Kulamada Dhageysiga ee lala leeyahay Hawl wadaagayaasha Waxbarashada Hore, Ururada Ku Saleysan Bulshada, iyo Ururada Dhaqan ahaan Gaarka ah

Waaxda Waxbarashada ee Oregon (ODE) iyo Waaxda Waxbarashada Hore yo Daryeelka (DELC) waxay la soo shaqeeyeen bulshooyinka Oregon si loola yimaado siyaabo lagu wanaajinayo taageerada carruurta marka ay bilaabaan dugsiga barbaarinta carruurta 'kindergarten'. Sanadihii 2022 iyo 2023, waxay tijaabiyeen kulamo loo yaqaan "Wada hadalka Qoyska" si loo buuxiyo hadafkani. Qoysaska iyo barayaasha ayaa u kulma si fool ka foolka ah si looga hadlo sida ay carruurtooda dhigata dugsiga barbaarinta 'kindergartner' uga caawin lahaayeen in ay guuleystaan. Gu'ga 2024, ODE iyo DELC waxay la soo shaqeeyeen OKT si dadka loogala hadlo isbeddelada. Hay'aduhu waxay rabeen in ay ogaadaan haddii Wada hadalka Qoyska uu caawin karo ururada caawiya qoysaska leh carruur yar yar. OKT waxay dad ka socda ururada la shaqeeya qoysaska iyo carruurta yar yar ula hadashay siyaabaha kala duwan.

OKT waxay qabatay wareysiyo iyo kulamada dhegaysiga kooxaha si dadka loo weydiiyo kuwa soo socda:

- Sida ay qoysaska hadda uga qayb geliyaan shaqadooda
- Waxa ay la kulmaan marka ay carruurta ka caawiyaan in ay bilaabaan dugsiga
- Sida Wada hadalka Qoyska looga dhigo mid waxtarka ugu badan leh
- Sida ururada bulshada iyo hay'adaha gobolku u wada shaqeyn lahaayeen si ay wax badan uga ogaadaan waayo-aragnimada carruurta iyo qoysaska ka hor inta aysan bilaabin dugsiga barbaarinta carruurta 'kindergarten'.

Warbixintani waxay sheegaysaa sida iyo waxa ay OKT maqashay. Warbixintu waxay diiradda saaraysaa Wada hadalka Qoyska iyo in qoysaska iyo carruurta laga caawiyo in ay bilaabaan dugsiga barbaarinta carruurta 'kindergarten'. Laakiin waxaa sidoo kale la wadaagayaa fikradaha ku saabsan xiriirka u dhexeeya waxbarashada hore iyo waxbarashada K-12 guud ahaan.

## Ku saabsan Oregon's Kitchen Table

OKT waa qayb ka mid ah Jaamacadda Gobolka Portland. OKT waxay ka shaqeysaa in dadka oo dhan la siiyo cod ah dhanka go'aan qaadashada dadweynaha. Waxaanu la hadalnaa dadka aan sida caadiga ah lagu darin go'aanadani. Waxaan dadka ka caawinaa in ay ka hadlaan arrimaha gobolka degaanka, iyo heerka gobol. Waxaa dhici karta in aanu isticmaalo siyaabo badan iyo luqaddo badan si loo ogaado waxa ay dadku qabaan iyo waayo-aragnimada. Waxaanan qiimeynaa fikradaha kala duwan iyo waayo-aragnimada dadku wax nooga sheegaan.

## Cidda aan la hadalnay

OKT waxay sameysan wareysiyo iyo kulamo dhageysi. Waxaan wax ka maqalnay 114 qof. Dadku waxay ka kala socdeen lixdan urur oo caawiya carruurta iyo qoysaskooda. Ururada waxaa ka mid ah kuwa soo socda:

- Sideed iyo labaatan urur oo u adeega qoysaska ka soo jeeda qoysas dhaqamo gaar ah leh
- Lix ah Xarumada Waxbarashada Hore
- Afar ah Barnaamijyada Head Start
- Laba ah barnaamijyada Qabiilka
- Isku dhafka Degmooyinka Adeega Waxbarashada, hay'adaha dadweynaha, iyo ururada kale ee bulshada

## Waxa dadku isku raaceen

Dad badan ayaa sheegay waxyaabaha soo socda ee ku saabsan in carruurta laga caawiyo in ay bilaabaan dugsiga barbaarinta carruurta 'kindergarten':

- Wada hadalka Qoysku in uu yahay tallaabo wanaagsan oo lagu caawinayo in carruurtu dareemaan in la soo dhaweynayo marka ay bilaabaan dugsiga.
- Lahaanshaha iskaashi u dhexeeya dugsiyada, ururada bulshada, iyo barnaamijyada waxbarashada hore uu wax caawin karo.
- Dugsiyadu in ay xaqiijin karaa in ay dhisaan aaminaad lala leeyahay qoysaska ka hor inta uusan dhicin Wada hadalka Qoysku.
- In ay muhiim u tahay qoysaska iyo carruurtu in ay arkaan luqadahooda, dhaqamadooda, iyo qiyamkoodu oo ka muuqda dugsiga si ay u dareemaan in la soo dhaweynayo.
- Dadku waxay u arkaan in lahaanshaha macluumaad aasaasi ah oo ku saabsan waxa ay u egtahay in la aado dugsiga iyo in la bilaabo dugsiga barbaarinta carruurta 'kindergarten' uu noqon doono mid waxtar leh. Haysashada macluumaadkani oo ku qoran luqaddo badan waa mid muhiim ah.

Dad badan ayaa si ballaaran u wadaagay fikradaha soo socda ee ku saabsan waxbarashada K-12:

- Dadku waxay jeclaan lahaayeen in ay arkaan fursado dheeraad ah oo ay yeeshaan qoysaskoodu si loo dhiso xiriiro lala leeyahay dugsiga ilmaha iyo macallimiinta.
- Dadku waxay rabaan in ay arkaan dugsiyada, ururada bulshada, iyo barnaamijyada waxbarashada hore in ay u wada shaqeeyaan sii fiican oo joogto ah.
- Waxaa jira rabitaan xoog leh oo loo qabo waxbarashada hore oo badan oo lacag la'aan ah ama qiime jaban leh. Dadku waxay rabaan in ay haystaan barnaamijyada waxbarashada hore oo badan oo ka tarjumaya dhaqamo iyo luqado badan.

- Dadku waxay daneynayaan fursado dheeraad ah oo ay wax kaga bartaan dadka ka tirsan ururada iyo gobolada kale.
- Waxaa jirta baahi loo qabo in la helo habab si wanaagsan loogu wadaago macluumaadka oo ka dhexeeya dugsiyada, ururada iyo hay'adaha.

## Waxa dadku u arkaan si kala duwan

Waxaa jira arrimaha qaarkood oo dadku ku kala aragti duwan yihiin. Waxaa sidoo kale jira arrimaha qaarkood uu ku saabsan kuwa ay yihiin dadka qaba dareen ah in uu khilaaf jiro. Waxaan maqalnay in:

- Dadku leeyihiin siyaabo kala duwan oo ay ku soo ururiyaan xogta iyo macluumaadka ku saabsan qoysaska ay taageeraan. Waxaa sidoo kale jira kala duwanaansho ah siyaabaha dadku u dhisaan xiriiro lala leeyahay qoysaska. Way adag tahay in la isku dayo in si wadajir ah loo wada sameeyo labadoodaba. Dadka qaarkood ayaa sheegay in aysan rabin siyaabaha lagu soo ururinayo macluumaadku ay horjoogsadaan dhisida xiriirada.
- Dadka qaarkood ayaa raba su'aalo gaar ah oo dheeraad ah oo loo adeegsado Wada hadalka Qoyska.
- Dadka qaarkood ayaa u arka in booqashooyinka gurigu waxtar u leeyihiin dhisida xiriirada. Dadka kale ayaa u arka in qoysaska qaarkood aysan ku qanacsanayn booqashooyinka guriga. Waxtar uma yeelan doonaan dhisida xiriirada qoysaskaasi.
- Dadka qaarkood ayaa qaba in ururadoodu ay dhici karto in aysan haysan waqti ay iskaashi kula sameeyaan dadka kale. Dadka qaarkood ayaa ka walwalsan dadaalada iskaashiga lagu sameynayaa ay ku koobnaan doonaan oo kaliya ururo dhowr ah.
- Waxaa jira aragtiyo kala duwan oo ku saabsan waxa waxtar u yeelan doona in wax laga ogaado in carruurta laga caawiyo in ay bilaabaan dugsiga.

## Talo soo jeedin

Iyada oo ku saleysan waxaanu maqalnay, waxaan ku talinaynaa in ODE iyo DELC sameeyaan kuwa soo socda si ay qoysaska iyo carruurta u caawiyaan marka ay bilaabaan dugsiga barbaarinta carruurta 'kindergarten':

- In ay qoysaska in badan kala hadlaan waxa ay rabaan ee la xiriira soo dhaweynta diiran ee dugsiga barbaarinta carruurta 'kindergarten'. In diiradda la saaro la hadalka qoysaska ka soo jeeda kooxo dhaqamo gaar ah leh.
- Marka la joogo Wada hadalka Qoyska, in qoysaska la siiyo macluumaad aasaasi ah oo ku saabsan dugsiga Oregon iyo dugsiga barbaarinta carruurta 'kindergarten'. In ay bixiyaan macluumaad ku qoran luqaddo badan.

Iyada oo ku saleysan waxaanu maqalnay, waxaan ku talinaynaa in dugsiyada iyo degmooyinku sidoo kale ka fikiraan fikradahan si ay qoysaska iyo carruurta u caawiyaan marka ay bilaabaan dugsiga barbaarinta carruurta 'kindergarten':

- Ka qayb gelinta dad lagu kalsoon yahay ee in carruurtu dareemaan in la soo dhaweynayo marka ay bilaabaan dugsiga. Tusaale ahaan, ka qayb galinta dadka ka socda barnaamijyada waxbarashada hore iyo ururada u adeega dhaqamo gaar ah.
- In la iska kaashado qorshe loogu talagalay wacyigelinta bulshada oo ku saabsan bilaabida dugsiga. Ka shaqeynta qorshe lala leeyahay barnaamijyada waxbarashada hore iyo ururada u adeega dhaqamo gaar ah.

Iyada oo ku saleysan waxaanu maqalnay, waxaan ku talinaynaa in ODE iyo DELC ka fikiraan fikradahani loogu talagalay waxbarashada hore iyo nidaamyada waxbarashada K-12 guud ahaan:

- La hadalka noocyo badan oo ururo ah oo taageera qoysaska leh carruur yar yar. Tusaale ahaan, la hadlaan maktabadaha iyo barnaamijyada degaanka.
- Kordhinta meelo loogu talagalay waxbarashada dadka isku faca ah.
- Dhisida isku xirnaan iyo kordhinta wada xiriirka ee guud ahaan nidaamyada iyo ururada.

## Gunaanadka

Dadka waxaa ka go'an in ay qoysaska ka caawiyaan in ay si habsami leh u bilaabaan dugsiga. Waxay aamisan yihiin qiimaha ay leedahay in si wada jir ah wax loo wada barto iyo in la isku dayo waxyaabo cusub oo la sameeyo oo u shaqeysa xataa si ka sii wanaagsan. Waxay aaminsan yihiin in dhisida xiriiro la leeyahay ay tahay mid muhiim ah. Waxaan ku dhiirigelinaynaa ODE iyo DELC in ay martiqaadaan qoysas badan si loo qaabeeyo soo dhaweynta diiran ee ay tahay in dhammaan carruurtu dareemaan marka ay bilaabaan safarkooda dugsiga.